



## **Ku dhawaaqidda agaasimaha sharciga IX cusub, Liane Kehaulani O'Banion**

Asxaabta Qaaliga ah,

Waan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in Dr. Liane Kehaulani O'Banion ay ogolaatay dalabkayaga ah in ay noqoto Agaasimaha Dugsiga Bulshada Portland ee Xeerka sharciga IX, Tababarka iyo u hoggaansanaanta.

Xilkaan muhiimka ah, Dr. O'Banion waxay hogaamin doontaa hubinta in degmada u hogaansanto Sharciga IX, sharciga faderaalka ee mamnuucayo takooridda ku salaysan jinsiga ee dugsiyada helo maalgelinta faderaalka. Dr. O'Banion waxay hubin doontaa in ardayda, qoysaska, macalimiinta, maamulayaasha iyo bulshada PPS ay helaan wax barasho tayo leh iyo fursadaha hormarinta waxa ayna ka caawin doontaa baaritaanada arimaha shariciyada IX (Title IX).

Dr. O'Banion waxay Dugsiyada bulshada ee Portland (PPS) uga timid Jaamacada Gobolka Portland, halkaas oo ay ka shaqeyneysay tan iyo 2001 oo ay ka ahayd Agaasimaha Xarunta wax Barashada horayna uga ahayd Agaasima ku xigeen tan iyo 2016. Waa baare si sareyso oogu tababaran sharciga IX (Title IX) lehna aqoonsiyo badan, oo ay ku jiraan Qareenada Guud ee Oregon ee Shaqaalaha Ka hortaga Faraxumaynta, baaridda/U hogaansanaanta Sharciga IX oo ay ka heshay Fischer & Phillips iyo shahaadada baaraha dambiga quseeyo FETI hab-maamuska (Wareysiga Naxdinta Tijaabada Baaraha dambiga) hab-maamuska baaritaanka iyo wareysashada naxdinta.

Dr. O'Banion waxay shahaadada Bajalaha Sayniska ee Cilmi nafsiga, iyo Waxbarashada gaarka ah oo yar ka qaadatay jaamacadda Oregon, waxay sidoo kale laba shahaado ka qaadatay jaamacadda Portland state-Shahaadad mastar saynis ee qaangaarka & cilmi kororsiga, iyo shahaadada sare ee Waxbarashada ee Hogaaminta Waxbarashada.

Waxay ka shaqeyneysaa gudaha Xafiiska Adeegyada Taageerada Ardayga, oo waxay wargelineysaa James Loveland, Madaxa Agaasimaha Guusha iyo Caafimaadka Ardayda.

Fadlan igula soo biir soo dhaweynta Dr. O'Banion ee Dugsiyada Bulshada Portland.

Brenda Martinek

Madaxa Adeegyada Taageerada Ardayga